Heshiiska amaahashada kombiyuuterka iyo isticmaalka internetka maamulka waxbarashada ee degmada Karlshamn

Ardeyga dhigta dugsiyada dhexe ee degmada Karlshamns kommun waxaa loo ogolyahay inuu amaahdo kombiyuutar xilliga uu ku jiro waxbarashada dugsiga dhexe iyo sidoo kale isticmaalka internetka iskoolka. Kuwani waa qayb kamid ah qalabkaaga waxbarashada, waana qalab muhiim u ah waxbarashadaada. Waa muhiim in adiga iyo waalidkaaga aad si taxadir leh u akhridaan heshiiskan kadibna aad si wada jir ah u saxiixdaan inaad hesheen warbixintan iyo inaad aqbasheen qaybaha uu ka kooban yahay heshiiskani.

Xeerarka iyo mas'uuliyadda

Maarayn

Ardayga wuxuu mas'uul ka yahay inuu kombiyuutarka u isticmaalo, u xafido, una qaado si mas'uuliyadi ku dheehan tahay si aanay kombiyuutarka dhaawac usoo gaadhin. Guriga dibadiisa waa in kombiyuutarka markasta lagu xafidaa boorsada loogu talo galay ama wax u dhigma. Marka aad boorsada kurido waa inaad boorsada xidhaa. Guriga gudihiisa waa inaad isku laabtaa ama aad xidhaa kombiyuuterka marka aad qaadayso, si aad u yarayso khatarta ama dhaawaca ku imaan kara.

Kombiyuuterka gurigaaga ayaad u qaadanaysaa maalin kasta marka iskoolka uu dhamaado, haddii aanu iskoolku warbixin kale soo saarin, subax kastana waxaad kombiyuuterka la imaanaysaa iskoolka isaga oo jaajgaraysan. Haddii sobobo jira dartood aad ku qasbanaato inaad kombiyuuterka kaga tagto iskoolka waa in lagu qufulaa ama lagu xafidaa meel loo qoondeeyay ama meel loogu talo galay.

Isticmaalka

Qoraalka *Nätsäkert* oo laga helayo ikt.karlshamn.se, fayl ka dokumenti ayuu ku hoos jiraa Nätsäkert oo ah xeerarka ama shuruudaha la xidhiidha isticmaalka iyo ammaanka internetka.

Kombiyuuterka waa in goor kasta laga heli karo iskoolka. Casharada kala duwan ee iskoolka waxaa aad raacaysaa tilmaamaha macallinkaaga ee ku saabsan sida aad u isticmaalayso, waxa aad u adeegsanayso iyo goorta aad isticmaalayso kombiyuuterka. Haddii aad raaci waydo tilmaamaha macallinkaaga ama aad u isticmaasho kombiyuuterka si arbushaysa ama dhibaato ku keenaysa goobta waxbarashada, waxa uu xaq u leeyahay macallinkaagu ama qofka iskoolka ka socdaa inuu kaa qaado kombiyuuterka.

Kombiyuuterkan lama ogola in loo adeegsado ujeedooyin ganacsi, taas waxaa laga wadaa, shaqo laga helayo lacag oo ujeeddada ama qasdiga uu yahay inuu dakhli kasoo baxo.

Marka aad qalab/borogaraam soo dajisanayso ama soo roganayso waa mas'uuliyadaada inaad hubiso inaad haysato liisan ama ogolaansho sharci ah. Kama soo qaadi kartid in wax kastoo internetka ku jiraa ay bilaash yihiin.

Adiga ayaa sidoo kale ka masuul ah wixii ku kaydsan kombiyuuterka. Iskoolku kuuma gudayo qalabka ku kaydsan kombiyuutarka haddii, tusaale ahaan dib loo borogaraaminayo kombuyuuterka. Ku dadaal inaad ku kaydsato faylashaada ama qalabkaaga koontada aad ku leehahay google- ka (google-konto)Degmada Karlshamn.

Lama oggola in lagu soo dajiyo ama lagu shubo kombiyuuterka borogiraam aan ahayn ka iskoolka uu soo iibsaday.

Iskoolku wuxuu xaq u leeyahay haddii uu u baahdo inuu helo fursad uu ku isicmaalo kombiyuuterka sobobo adeeg, hubin ama dayactir.

Dhaawac/waxyeello

Haddii dhaawac soo gaaro kombiyuutarka ama uu shaqayn waayo waxaad sida ugu dhaqsaha badan ula xiriiraysaa qofka ka masuulka ah kombiyuuterada iskoolka, si loo xallilo qaladka ama dhibaatada.

Haddii uu soo baxo tuhun ama shaki ah inaad dayacday kombiyuutarka waxa uu qofka kombiyuuterada iskoolka ka masuulka ahi la xidhiidhayaa maamulaha iskoolka. Maamulaha iskoolka iyo waalidkaagu waxay ka wada hadlayaan oo ay go'aan ka gaarayaan sida loo gudayo ama loo magdhabayo dhaawaca qalabka soo gaaray.

Lacagta magdhawga ah ee dhaawaca soo gaara kombiyuuterka dayacaad darteed waxay noqonaysaa kharashka ku baxa dayactirka kombiyuuterka am barnaamujka ku jira.

Khasaare/qasaare

Haddii uu kaa lumo kombiyuutarku waxaad sida ugu dhaqsaha badan ula xiriiraysaa masuulka kombiyuuterada iskoolka si loo xiro kombiyuuterka loogana dhigo mid aanay isticmaali karin tuugadu.

Ku dadaal inaad indhaha ku hayso/ilaashato kombiyuutarkaaga. Haddii aad ka tagayso waa inaad ku qufushaa meel ammaan ah. Masuuliyada kuma halayn kartid ama kagama tagi kartid saaxiibadaa.

Kombiyuutarka la xado ama luma waa in markasta si dhaqso ah loogu sheegaa booliiska. Haddii meel iskoolka ka baxsan lagu xado kombiyuutarka, waalidka ayay saaran tahay masuuliyada wargalinta booliiska.

Nidaamka loo marayo wargalinta booliiska haddii kombiyuuterka la xado waqti ka baxsan xilliga iskoolka.

1. Foomka ama warqada ''Stöld av elevdator'' oo macnaheedu yahay xatooyo kombiyuutar arday waxaa lagasoo qaadanayaa xafiiska qaabilaadda ee iskoolka.
2. Macluumaadka kombiyuuterka ee soo socda ayaa lagu qorayaa, modell-ka kombiyuuterka, resurs-id iyo serienummer. La xiriir masuulka kombiyuuterada si aad u hesho macluumaadkan. Warqada ama foomka waxa la geynayaa xafiiska qaabilaadda ee iskoolka kasoo usii gudbin doona maamulaha dugsiga. Ardayga iyo waalidkana waxaa koobi laga siinayaa warqada ama foomka kaasoo loo isticmaalayo wargalinta booliiska.
3. Waalidku waxay wargalinayaan booliiska. Koobi warqada dacwada booliiska ah ayaa la siinayaa xafiiska qaabilaadda ee iskoolka.
4. Maamulaha dugsiga ayaa la xidhiidhaya waalidka ardayga, waxaana lagala hadlayaa haddii ardayga uu ahaa mid taxaddir badan ama mid dayacay ammaanada, qiimayntana waxaa lagu salaynayaa warbixinta ku qoran warqada wargalinta booliiska.

Haddii xukunku uu noqdo inaad taxaddir badnayd oo aad ilaalin jirtay kombiyuuterkaaga waxaad iskoolka ka amaahanaysaa kombiyuuter kale.

Haddii xukunku uu noqdo inaad kombiyuuterkaaga u maaraysay si aan taxaddir lahayn oo aad dayacday waxaa waalid kaaga ku waajibaya lacag magdhow ah oo u dhiganta qiimaha uu combiyuuterku jooga isla waqtigaa. Marka lacagtu ay soo gaadho iskoolka, wuxuu iskoolku kuu ogolaanayaa inaad amaahato kombiyuuter kale oo qalabkiisii wata.

Qiimaha ugu badan ee kombiyuuterka iyo qalabkiisa

Sannad dugsiyeedka koowaad gudihiisa =qiimaha suuqa ugu badnaan 2000 kr

Sannad dugsiyeedka labbaad gudihiisa =qiimaha suuqa ugu badnaan 1300 kr

Sannad dugsiyeedka saddexaad gudihiisa =qiimaha suuqa ugu badnaan 600 kr

Haddii fiilada ama jaajtarka kombiyuutarku kaa lumo, la xidhiidh oo ogaysii mas'uulka kombuyuuterada iskoolka. Lacagta jaajtarka luma waa 200 kr, marka ay waalidkaagu bixiyaan lacagta ayaa mid cusub lagu siinayaa

Soo celinta qalabka

Amaahdu waxay la xidhiidhaa inta uu ardaygu aadayo ama dhigto mid kamid ah dugsiyada dhexe ee degmada Karlshamn. Iskoolka ayaa wargelinaya goorta kombiyuuterada lasoo xeraynayo. Haddii kombiyuuterka iyo qalabkiisa lagu soo xerayn waayo todoba beri gudahood waxaa waalidka lagusoo dalacayaa lacagta aan kor kusoo sheegnay.

Qalabka waa in lasoo dhiibaa iyadoo xaaladiisu wanaagsantahay. Waxyaabaha soo socda ayaa la hubinayaa ama la kontoroolayaa.

- Qalabka – kombiyuuterka iyo jaajtarkiisa
- Daaris/shidid – hubin kombiyuuterka inuu shaqaynayo, korontada iyo shaashada
- Qaybaha gudaha ee kombiyuuterka – inay nabad qabaan xaaladooduna wanaagsantahay
- Dhaawacyada kale ee muuqda

Karlshamns Kommun • Utbildningsförvaltningen
Rådhuset • 374 81 Karlshamn · Tfn 0454-811 00 · Fax 0454-810 40
E-post: info@karlshamn.se · Internet: www.karlshamn.se

Heshiiska amaahashada kombuyuuterka iyo isticmaalka internetka maamulka waxbarashada ee Karlshamn

Heshiiska wuxuu la xidhiidhaa kombuyuuterka soo socda iyo qalabkiisa

Lambarka kombiyuutarka …….

Qalabka la socda: Jaajtar/Fiilo

- Amaahdu waxay la xidhiidhaa inta uu ardaygu dhiganayo mid kamid ah dugsiyada dhexe ee Karlshamn.
- Qalabkan waxaa loo isticmaalayaa si taxaddir leh sida aan hore u sheegnay (Akhri cutubyada ''maaraynta'' iyo ''isticmaalka'')
- Haddii kombiyuuterka uu lumo ama dhaawac soo gaadho waxa waalidka ku waajibaya lacag magdhow ah (Akhri cutubyada ''dhaawac'' iyo "lumis")
- Ardayga iyo waalidka waxay heleen qoraalka ammaanka internetka (Nätsäkert) waxayna ku xaqiijinayaan saxiixooda (nätsäkert waxaa laga helayaa ikt.karlshamn.se)

Laga bilaabo marka la saxiixo heshiiska waxay labada dhinacba ballan qaadeen inay ku dhaqmayaan heshiiska. Islamarkaasna wuxuu ardaygu saxiixiisa ku xaqiijinayaa inuu gudoomay kombiyuutar iyo qalabkiisii.

Ardayga

Waan akhriyay heshiiska amaahda kombiyuutarka iyo isitcmaalka internetka maamulka waxbarashada ee degmada Karlshamn iyo ammaanka internetka. Waanan fahmay heshiiska.

Saxiixa ardayga: _____

Magaca oo dhan: _____

Personnummer: (Lambarka dhalashada)_____

Taariikhda _____ Fasalka _____

Waalidka (Waalidiinta ay ka dhexeeyso mas'uuliyadda iyo daryeelka ilmuhu si wada jira ayay u saxiixayaan heshiishka) Aniga/annagu waan akhrinay heshiiska amaahashada kombiyuutarka iyo isticmaalka internetka maamulka waxbarashada ee degmada Karlshamn iyo ammaanka internetka (Nätsäkert). Si wada jir ah ayaan uga wada hadalnay waanan aqbalnay.

Saxiixa waalidka: _____

Magaca oo dhan: _____

Taariikhda: _____

Saxiixa waalidka: _____

Magaca oo dhan: _____

Taariikhda: _____

Heshiiska waxa laga dhigayaa laba warqadood: Warqad kamid ah heshiiska oo saxiixan waxaa loo keenaya iskoolka midna waxaa la hadhaya ardayga iyo waalidka.

Karlshamns Kommun • Utbildningsförvaltningen
Rådhuset • 374 81 Karlshamn · Tfn 0454-811 00 · Fax 0454-810 40
E-post: info@karlshamn.se · Internet: www.karlshamn.se

Heshiiska amaahashada kombuyuuterka iyo isticmaalka internetka maamulka waxbarashada ee Karlshamn

Heshiiska wuxuu la xidhiidhaa kombuyuuterka soo socda iyo qalabkiisa

Lambarka kombiyuutarka …….

Qalabka la socda: Jaajtar/Fiilo

- Amaahdu waxay la xidhiidhaa inta uu ardaygu dhiganayo mid kamid ah dugsiyada dhexe ee Karlshamn.
- Qalabkan waxaa loo isticmaalayaa si taxaddir leh sida aan hore u sheegnay (Akhri cutubyada ’’maaraynta’’ iyo ’’isticmaalka’’)
- Haddii kombiyuuterka uu lumo ama dhaawac soo gaadho waxa waalidka ku waajibaya lacag magdhow ah (Akhri cutubyada ’’dhaawac’’ iyo ”lumis”)
- Ardayga iyo waalidka waxay heleen qoraalka ammaanka internetka (Nätsäkert) waxayna ku xaqiijinayaan saxiixooda (nätsäkert waxaa laga helayaa ikt.karlshamn.se)

Laga bilaabo marka la saxiixo heshiiska waxay labada dhinacba ballan qaadeen inay ku dhaqmayaan heshiiska. Islamarkaasna wuxuu ardaygu saxiixiisa ku xaqiijinayaa inuu gudoomay kombiyuutar iyo qalabkiisii.

Ardayga

Waan akhriyay heshiiska amaahda kombiyuutarka iyo isitcmaalka internetka maamulka waxbarashada ee degmada Karlshamn iyo ammaanka internetka. Waanan fahmay heshiiska.

Saxiixa ardayga: _____

Magaca oo dhan: _____

Personnummer:(Lambarka dhalashada) _____

Taariikhda _____ Fasalka _____

Waalidka (Waalidiinta ay ka dhexeeyso mas’uuliyadda iyo daryeelka ilmuhu si wada jira ayay u saxiixayaan heshiishka) Aniga/annagu waan akhrinay heshiiska amaahashada kombiyuutarka iyo isticmaalka internetka maamulka waxbarashada ee degmada Karlshamn iyo ammaanka internetka (Nätsäkert). Si wada jir ah ayaan uga wada hadalnay waanan aqbalnay.

Saxiixa waalidka: _____

Magaca oo dhan: _____

Taariikhda: _____

Saxiixa waalidka: _____

Magaca oo dhan: _____

Taariikhda: _____

Heshiiska waxa laga dhigayaa laba warqadood: Warqad kamid ah heshiiska oo saxiixan waxaa loo keenaya iskoolka midna waxaa la hadhaya ardayga iyo waalidka.

Karlshamns Kommun • Utbildningsförvaltningen
Rådhuset • 374 81 Karlshamn · Tfn 0454-811 00 · Fax 0454-810 40
E-post: info@karlshamn.se · Internet: www.karlshamn.se